

## La tashigu wuxuu u furan yahay dadka degan 29 Crown Street

Dadka degan Crown Street ayaa lagu martiqaaday inay ka qeybqaataan xog-ururin kooban.

Kani ma aha foomka rasmiga ah ee uu qofku buuxinayo marka la rarayo. Waxay naga caawinaysaa uun in aan qorshayno baahiyaha bulshada inta ay socdaan howlaha guuritaanka.


Waraaqo, iimaylo iyo fariimo qoraal ah ayaa la diray waxaana ku qornaa koodh/fariin gooni ah.

Booqo bogga internet ka ee xog-ururinta oo geli koodhka gaarka ah ugu dambeyn **12-ka habeenimo ee saqda dhexe markay taariikhdu tahay 27-ka bisha Maarso 2026.**

Dadka guryaha degan ee khadka online/internet ka uga qeybqaata xog-ururinta waxay haystaan fursad ay ku heli karaan abaalmarin ah **1 ka mid ah 10 foojaro oo ay kiiba kujirto \$200** oo ay uga dukaameysan karaan Woolworths, BigW ama goobaha shidaalka ee EG Ampol.



Iskaan garee QR koodhka ama booqo [homes.vic.gov.au/relocations-survey](https://homes.vic.gov.au/relocations-survey)




## Nagu xirnoow

- Kulamada la isku xog wareysanayo**
- Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga**
- Isdiiwaangeli si aad ula socoto wixii soo kordha**

Si aad wax kasta ula socoto booqo:

[homes.vic.gov.au/flemington-precinct](https://homes.vic.gov.au/flemington-precinct)



nagala soco baraha bulshada raadi **Homes Victoria**



**DHISMAHA GURYAHA EE WEYN**

Wixii kusoo cusboonaaday Bulshada **Flemington**



### Waxa ka socda goobta

#### Nagala soo qeybgal Dabaaldega Ciidda!

Axada 29-ka bisha Maarso, 1-da ilaa 5-ta galabnimo goobtuna waa Buncl Street Reserve, North Melbourne

#### Qaboojiyeyaal ayaa lagu xirayaa

Hawlo shaqo ayaa waxay ka socotaa 126 iyo 130 Racecourse Road

#### Kaabayaasha goobta oo ay shaqo ka socoto

Deegaanka oo dhan waxaa sanadka 2026 ka qabsoomi doona hawlo shaqo oo lagu dayactirayo kaabayaasha guud. Howlahaas shaqo waxba uma dhimi doonaan adeegyada muhiimka ah, sida korontada iyo biyaha. Shaqadu waxay bilaaban doontaa isbuucyada soo socda.

**Waxaan halkaan u joognaa dadka degan 29 Crown Street**

Wadatashiyada lala yeelanayo dadka guraya ayaa hada furan

# Maxaa ka socda Flemington

Bisha Maarso 2026



**Holland Court:**  
286 guri oo cusub iyo barxad loogu talagalay dadweynaha

**Shaqo ayaa meesha ka socoto**

- Da'daalo lagu hubinayo tayada ayay ka socotaa guryihii ugu horeeyay
- Shaqo ayaa laga bilaabayaa barxadaha dadweynaha

**12 Holland Court**

**Sugidda dhismayaasha**

- Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah
- Waxyaabo yaryar oo agab ah ayaa laga qaadi doonaa guryaha la faaruqiyay, meelaha dhexe albaabada laga soo galo hortooda ah, meelaha wiishashka, dibedda dhismaha
- Khaanadaha, roogaga iyo waxyaabaha saaran dhulka iyo qalabka kale oo yar oo guryaha la faaruqiyay ku dhagan ayaa la saari doonaa
- Meelo ku meel gaar ah ayaa shaqaalaha loo sameyn doonaa

**Xiritaanka Baarkinada baabuurta la dhigto**

- Tiro yar oo baarkinada baabuurta la dhigto ah oo u dhow 12 Holland Court ayaa hadda xiran si aan meesha uga qabano howlo shaqo

Debneys Park

Victoria Street

Holland Court

Racecourse Road

**126 iyo 130 Racecourse Road**

**Howlo shaqo oo waxyaabaha korontada la xiriira**

- Hawlo shaqo oo koronto ah ee Nidaamyada Digniinta Xilliyada Hore ah ayaa sii socon doona

**Rakibida qaboojiyayaalka ayay ka sii socon doonaa 126 Racecourse Road**

**120 Racecourse Road**

**Sugidda dhismayaasha**

- Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah
- Waxyaabo yaryar oo agab ah ayaa laga qaadi doonaa guryaha la faaruqiyay, meelaha dhexe albaabada laga soo galo hortooda ah, meelaha wiishashka, iyo dibedda dhismaha

**Kaabayaasha goobta oo ay shaqo ka socoto**

- Shaqaoyinkaas waxaa lagu xaqiijin doonaa in dhismayaasha cusub si fudud loogu soo xiro koronto iyo biyo inta goobta la dhisayo
- Shaqada ayaa la filayaa inay bilaabato asbuucyada soo socda waxaana la qorsheeyay inay sii socoto ilaa dhamaadka sanadka 2026
- Marba qeyb ayaa la qaban doonaa si loo yareeyo culeysyada ka dhalan kara
- Calaamadaha wax tilmaama/sharaxa iyo qalabka wadada lagu xiro ayaa goobta yaal si aysan dadka dhibaato u soo gaarin
- Wadooyinka laga galo guryaha ayaa sii furnaan doona, balse waxaa laga yaabaa xilliyada qaar wadooyin kale lagu hago cid kasta oo meesha soo galaysa
- Isha ku hay macluumaadka ku saabsan waxa loo baahan yahay inaad samayso marka ay hawshu socoto

**Shaqooyin yar oo wadada laga hayo**

- Isbeddello lagu sameynayo meelaha ay dadka ku lugeeyaan ee Holland Court
- Wadooyinka ay dadka ku lugeeyaan (footpath) iyo baarkinada baabuurta la dhigto qaar ka mid ah ayaa la xiri doonaa muddo kooban
- Dadka baabuurta kala haga ayaa goobta ku sugnaan doona si ay u kala hagaan gawaarida iyo dadka lugeynaya



Shaqadayada waxaa haga saacadaha shaqada ee golaha deegaankaaga:

**Isniin ilaa Jimce**

inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo iyo 6-da fiidnimo

**Sabti**

inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

Dadka goobta degan ee u baahan macluumaad dheeraad ah ha la xiriiraan xafiiska guriyeynta ee deegaankooda:

1300 360 462

ascotvale.housing@dffh.vic.gov.au



Mararka qaarkood ogolaanshaha (permit) ay bixiyaan golaha deegaanka ayaa loo baahan yahay si looga shaqeeyo wax ka baxsan saacadahan laakiin dadka goobta degan waan la socod siin doonaa haddii ay tani dhacdo.



Dhammaan howlaha shaqooyinka waxaa lagu fulin doona heerarka ugu sarreeya ee badbaadada iyo shuruudaha sharciga.

## Jadwalka shaqo ee howlaha dib-u-dhiska

12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road  
Waxba lama burburin ah oo la sameyn doono ma jiri doonto inta ay dadku wali dhismooyinkan ku jiraan.

2025

### 1. Inaad wax badan ogaato oo ay waxkastana ammaan kuu ahaadaan

- Sugidda guryaha bannaan
- Kormeerista goobta iyo dhismayaasha si qalabka loogu maareeyo si amaan ah
- Joogtaynta dayactirka joogtada ah

2026: Waa nakan

### 2. Diyaargarowga

- ✓ Diyaarinayo goobta iyo calaamadaha wax haga/tilmaamaya si loo sugo ammaanka goobta
- ✓ Hubinta isku xirka adeegga
- ✓ Dadka lugeynaya, baabuurta iyo baarkinada baabuurta oo howlahooda ammaan laga dhigayo
- ✓ Dhismayaasha gudahooda ayaa waxaa laga hayaa shaqo si looga dhigo kuwo amaan ah
- ✓ Guryaha la faaruqiyay ayaa waxaa laga saarayaa armaajooyinka, waxyaabaha dhulka saaran iyo waxyaabo kale oo guryaha kujira

### 3. Duminta

- Rakibaadda biraha wax lagu dhisayo (scaffolding)
- Dhismaha marka si taxadar leh oo tartiib-tartiib ah loo burburinayo
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonada



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan macluumaad ku qoran luqadaada booqo: [homes.vic.gov.au/information-in-your-language](https://homes.vic.gov.au/information-in-your-language)



Wixii su'aalo guud ah iimayl u dir:

enquiries@homes.vic.gov.au